

Sheeko ku saabsan in aan ka rabo baska boos cayiman



Baska waxa ku yaal boosas badan oo kala duwan.

Dadka raacaya basku waxay fariistaan boos firaaqo ah.

Marmar boosas badan baa firaaqo ah oo la kala xushaa. Marmarna in yar baa bannaan.

Mar walba isku meel baan rabaa inaan

baska ka fariisto.

Haddii booskaa la fadhiyo waan xanaaqi.

Markaa waxaan ku fekeri karaa:

Maanta waan nasiib darraa! - booskaygii waa la fadhiyey!

Sax maaha in qof boos fadhiya laga dalbado inuu ka kaco.

Maanta boos kale ayaan fariisanayaa inkastoo aanan sidaa jeclayn.

Booska aan jeclahay waxaan fariisanayaa marka uu firaaqo yahay.

Ma sii ogaan karo inuu booskii firaaqo yahay laakiin mar kastuu yahay waan farxaa!